



# Orientation to Ontario

## DARYEELKA ILMAHA

### NOOCYADA DARYEELKA ILMAHA

Qarashaadka labadaba nooc ee daryeelka ilmaha ayaa aad u kaladuwan xarumaha kaladuwan ee daryeelka ilmaha ayaana leh xeerar kaladuwan. Qaarkood ayaa doonaaya in cunugaagu daryeelka ka qaybgalo waqti buuxa. Xarumo kale ayaa bixiya daryeelka ilmaha ee waqtiga gaarka ah iyo ilmaha la keeno. Waxaa jiri kara liiska sugitaanka oo aad u dheer.

### DARYEELKA ILMAHA EE RUQSADA LEH

Sida ku cad Sharciga Baxnaaninada Ilmaha ee Maalintii, daryeeyaasha daryeela wax ka badan shan ilmood oo aan qaraabadooda ahayn kana yar toban jir waa inay ruqsad ka haystaa Wasaarada Waxbarashad. Xarumaha daryeelka ubadka ee ruqsada leh waxaa si joogto ah u kormeera shaqaalaha Wasaarada si loo xaqiijiyo inay buuxshaan shuruudaha caafimaadka, badqabka iyo tababarka daryeelaha. Daryeelka ilmaha ee ruqsada leh ayaa noqon kara guri gaar loo leeyahay, dugsii, xarun bulsho ama xarun gaar ah. Qaar kamid ah xarumaha daryeelka ee ruqsada leh gaar ayaa loo leeyahay halka qaar kale ay maamulaan iskaashato, kuwaas oo waalidku ka qaybgalo maamulkooda.

Ka ogoow xog ku saabsan dookhyada daryeelka ilmaha Wasaarada Waxbarashada oo aad ka helayso [edu.gov.on.ca](http://edu.gov.on.ca) ama [findlink.at/childcare](http://findlink.at/childcare)

### DARYEELKA ILMAHA EE AAN RUQSADA LAHAYN

Daryeeyaasha daryeel siiya shan

ilmood ama kayar oo aan ahayn qaraabadooda kuna daryeela gurigooda ayaan u baahanayn ruqsad.

Marka aad doorato daryeelka ilmaha ee aan ruqsada lahayn, waa inaad ku tiirsanaato garashadaada si aad u hubiso in dookhyo daryeel ku haboon siinaaya ilmahaaga.

### KAALMOOYINKA DARYEELKA ILMAHA

Haddii aadan bixin karin qarashka daryeelka ilmaha, waxaad u qalmi kartaa kaalmo dhaqaale. Kala hadal la taliyahaaga dib u dejinta ama booqo webseedka Wasaarada Waxbarashada oo ah [edu.gov.on.ca](http://edu.gov.on.ca) ama [findlink.at/payingchc](http://findlink.at/payingchc)

Si aad u hesho wakaaladai dib u dejinta oo kuu dhow, booqo [settlement.org](http://settlement.org)

### GUNNADA ILMAHA EE CANADA (CCB)

CCB waa lacag bil kasta la baxsho oo aan la canshuurin lana siiyo qoysaska u qalma si looga caawiyo qarashka korinta ilmaha kayar 18 sano. Qof kasta oo masuul ka ah daryeelka aasaasiga ah ee ilmo ayaa heli kara gunnada.

Wixii xog dheeraad ah, booqo Service Canada [servicecanada.gc.ca](http://servicecanada.gc.ca) ama [findlink.at/UChildCB](http://findlink.at/UChildCB)

### OGEYSIIS MUHIIM AH

Waxaa jira labo nooc oo daryeelka ilmaha ah gudaha Ontario: mid ruqsad leh iyo mid aan ruqsad lahayn. Waa in aad ka fakartaa labadaan dookh kadibna aad xulataa maslaxada ugu habboon qoyskaaga.

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par

## XARUMAHA DHALAANKA EE ONTARIO

Xarumaha Dhalaanku waa barnaamijyo lagu baxsho xarumaha bulshada ee dhammaan gobalka.

Waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha ayaa keeni kara ilmahooda ilaa lix sano jirka ah si ay ugu ciyaaraan waxna uga baxtaan xarumaha dawladu maalgeliso, waana in waalidku la joogo. Xarumuhu waxay sidoo kale xog ka baxshaan adeegyada qoyska mana jirto lacag ku baxaysa booqashada.

Si aad u hesho xarun kuu dhow, wac ServiceOntario 1-800-268-1153 ama booqo barta Wasaarada Waxbarashada [oeyc.edu.gov.on.ca](http://oeyc.edu.gov.on.ca) ama [findlink.at/EarlyYearC](http://findlink.at/EarlyYearC)

## DUGSIGA BARBAARINTA EE MAALINTA OO DHAN

Dugsiyada dadwaynaha ee Ontario ayaa hadda baxsha barbaarinta maalintii oo dhan ee ilmaha jira afar iyo shan sano. Inta badan barnaamijyada barbaarinta waxaa ku jira labadaba macalinka iyo barbaariyaha ilmaha aadka u yar. Dugsiyada qaar ayaa sidoo kale baxsha barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib ee ardayda dugsiga barbaarinta laga bilaabo 7:00 a.m. ilaa 6:00 p.m. Dugsiga barbaarintu waa lacag la'aan, laakiin qoysasku waa inay baxshaan qarash macquul ah si ilmahoodu uga qaybgalaan barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib, kuwaasoo badanaa muddo la sugo.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Wasaarada Waxbarashada oo aad ka Helayso [edu.gov.on.ca](http://edu.gov.on.ca) ama [findlink.at/full-dayK](http://findlink.at/full-dayK)



### MA OTAHAY?

*Qaar badan oo kamid ah xarumaha daryeelka ilmaha ayaa shaqaalaysiisa daryeelayaasha haysta shahaadooyinka Waxbarashada Dhalaanka (ECE).*

